

Ogeysiiska dugsi ka joojinta

Isticmaalida adeega turjumaanka taleefanka si aad dugsiga ula xiriirto

Magaca ardayga
Name of student

Gacaliye xannaaneeye/waalid

Warqada ku lifaaqan ayaa sharxaysa faahfaahinta Ogeysiiska dugsi ka joojinta ee aan siiyey ilmahaaga sida waafaqsan nidaamyada Cayrinta iyo dugsi ka Joojinta ee Qorshaha Dabeeecada Ardayga Wasaaradda Waxbarashada NSW.

Warqadu waxay kugu martiqaadysaa inaad timaado kulanka natijada si looga wada hadlo dugsi ka joojinta oo loo qorsheeyo wixii taageero ah marka ilmahaagu dugsiga ku soo noqdo. Marka dugsigu kula soo xiriiro, fadlan noo soo sheeg haddii aad ugu baahan tahay turjubaan kulanka waana kuu qabanaynaa. Haddii aad dhib kala kulanto fahamka warqada ku lifaaqan fadlan la xiriir dugsiga si aan u sharaxno.

Waxaa ku lifaaqan macluumaadka ku saabsan waxaad u baahan tahay inaad ogaatid haddii ilmahaaga dugsiga laga joojiyo.

Haddii aad u baahan tahay caawimaada turjubaan markaad la xiriiraysid dugsiga, fadlan wac 131 450 oo weydiiso turjubaan luuqadaada ah. U sheeg xiriiriyuhu inuu kuu waco lambarkaad dooneysid inaad wacdo, waxayna khadka soo gelin doonaan turjubaan kaa caawiya wada hadalka. Adeegan wax lacag ah lagaama qaadi doono.

Magaca Maamulaha
Name of Principal

Lambarka taleefanka Maamulaha
Principal's phone number